



Cusbooneysiinta Mashruuca Casriyeynta Jefferson Juun 2024

Qoysaska & Bulshada Jefferson ee qaaliga ah,

Fariintani waa qayb ka mid ah taxane joogta ah oo ah wararkii ugu dambeeyay ee Mashruuca Jefferson si ay kuugula socodsiiyaan marka mashruuca Casriyeynta Jefferson uu marayo wejigiisa naqshadaynta. Waxaad ka akhrisan kartaa wararkii hore [halkan](#).

Soo degso warqadda cusub ee ku saabsan Mashruuca Jefferson

[Halkan ka eeg warqadda Mashruuca Casriyeynta ee Jefferson](#). Waxa ku jira mashruuca oo la soo koobay iyo macluumaad kale oo ku saabsan shaqada. [Español](#) | [Tiếng Việt](#) | [Русский](#) | [Soomaali](#) | [中文](#)

[Tan iyo wararkii u dambeeyay](#), Kooxda Mashruucu waxay la kulmaysay Degmada iyo shaqaalaha dugsiga si loo hagaajiyo qaabka goobta iyo dhismaha. PPS waxay la shaqaynaysaa kooxaha naqshadeeyayaasha iyo kuwa qandaraaslayaasha ah si ay u go'aamiyaan habka ugu wanaagsan ee lagu dhisayo dugsi sare oo casri ah oo ku yaala dhanka waqooyi ee kambaska, iyadoo la siinayo dhammaan goobaha ciyaaraha ee lagama maarmaanka ah iyo adeegyada goobta. Marxaladda naqshadaynta mashruuca waxa ay socon doontaa ilaa taariikhda la qorsheeyay in la bilaabo dhismaha xagaaga ee 2025. Degmadu waxay sidoo kale bilawday la shaqaynta bulshada taas oo qayb ka ah qorshe cusub oo wacyigelin ah oo la bilaabi doono toddobaadyada iyo bilaha soo socda.

Fursadaha ka-qaybgalka ee soo socda

PPS waxay qaban doontaa bilaha soo socda kulamo isdaba joog ah si ay u bixiyaan warar cusub iyo si ay talo uga helaan bulshada Jefferson. Taariikhaha waa la go'aamin doonaa waxaana lagu dhawaaqi doonaa waqti dhow.

Si joogto ah u booqo websaydka si aad macluumaad dheeraad ah u hesho

Websaydka mashruuca Casriyeynta Jefferson, <https://www.pps.net/JeffersonBond> waxay kula socdsiin doontaa wixii ku soo kordha, oo ay ku jiraan liiska fursadaha hawlgelinta ee soo socda iyo bandhigyadii hore ee kulanka.

Waad ku mahadsan tahay inaad naga caawisay abuuritaanka Dugsiga Sare Jefferson oo cusub qarniga 21aad.

Kooxda Mashruuca Jefferson